



Xusuusin: Dheereynta iyo Kobcinta Waxbarashada Xilliga Xaggaaga- Boosas Ayaa Ka Bannaan

Juun 10, 2022

Qoysaska Qaaliga ah ee PPS,

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay ku faraxsan yihiin inay idin siiyaan dheereynta iyo kobcinta waxbarashada xilliga xaggaaga oo lacag la'aan ah. Fursadahaani waa kuwa lagu talagalay in la siiyo dhammaan ardayda da' kasta leh, iyada oo waxyaabaha la siinayo ay ka mid yihiin taageerida waxbarashada, dhammeystirka derejooyinka buundooyinka dhiman ee ardayda dugsiyada sarre sidii ay uga qalin-jabin lahaayeen dugsiyada sarre, hawlaha kobcinta, iyo waayo-aragnimada hab waxbarashadiisu ku salaysan tahay dhaqanka ardayda. Barnaamijyadani waxaa bixinaya saaxiibadayada bulshada iyada oo liistada barnaamijyada saaxiibada bulsho kasta ay ku taxan yihiin [buug-yarahani](#). Waxaan sidoo kale laga helayaa fursadahaani [shabakadani](#), halkaasi oo aad ka raadin liistooyinka dugsiyada iyo maadadda.

Fursadaha shaqaaleysiinta dhallinyarta ee xilliga xaggaaga, fadlan waxaad gujisaa [linkingani](#).

Ardayda iyo /ama qoysaska u baahan doona inay la soo xiriiraan hay'adaha sidii ay u heli lahaayeen macluumaad badan oo ku saabsan fursadaha shaqo ee dhallinyarada.

Waad mahadsan tihiin,

Dani Ledezma

La-taliye Sarre,

Sinaanta Jinsiga & Cadaalada Bulshada